



# TODOBAADKA XAQIIQO RAADINTA

## Dib uga fekeridda is-dhexgalka & barakaca Soomaaliya



### WAA MAXAY?

Waa todobaad xaqiiqo raadin ah oo ku saabsan barakaca Soomaaliya si loo taageero wadaagidda aqoonta iyo cilmi-baarista si loosoo bandhigo siyaasado & barnaamijyo keena xalal waara oo ku saleysan xaqiiq.

### UJEEEDKA?

Ujeedka waa in la-falanqeeyo lagana doodo cilmi-baarisyo iyo cadeymo lasoo aruurinayay muddo laba sano ka badan kuwaas oo ku saabsan sidii xal waara loogu heli lahaa xaaladaha nololeed ee barakacayaasha iyo sidii yididiloooyinkooda loo hirgelin lahaa.

### SIDEE?

Munaasabado dhowr ah ayaa lagu qaban doonaa meelo kala duwan oo Soomaaliya kamid ah todobaadkan oo ay hogaaminayaan hay'ado aan bahwadaag nahay oo Soomaaliyeed. Doodo, aqoon isweydaarsi, farshaxan iyo bandhig dhaqameed ayaa lagu soo bandhigi doonaa. Ciddii daneyneysa waa ay nagu soo biiri kartaa.

### GOOBTA IYO GOORTA

Laga bilaabo 26-ka illaa iyo 30-ka November. Waxaana munaasabadaaha ay ka dhici doonaan Baaydhabo, Doolow, Kismaayo & Muqdisho

